



U yeeritaanka dhammaan tabarucayaasha loogu yeerayo Mashruuca Daryeelka Bulshada

Soo qaado galoofyada beertaada, maqasyada iyo burushka rinxiga isla markaana Sabtidan u soo jihayso dugsiga xaafadaada taasi oo loogu talagalay dabaaldega sanadlaha ah ee wax nadiifinta.

Ardayda, waalidiinta, shaqaalaha iyo bulshada tabarucayaasha ah waa lagu martiqaaday in ay ka soo qayb galaan maalinta Mashruuca Daryeelka Bulshada ee bilaabmaya 9 subaxnimo ilaa duhurka, Ogoosto 26. Ku soo biir xafladda nadiifinta isla markaana dugsiyada degaanka ka taageer mashaariicda sida jaridda dhirta/cawska, jaridda laamaha/caleemaha, wax beerida, wax dhaqida iyo rinjiyantaa.

Inkasta oo dugsiyada xagaaga oo dhan isku diyaarinayeen in ay dib u soo dhaweyyaan ardayda iyo shaqaalaha, maalinta Mashruuca Daryeelka Bulshada waa munaasabadeena ugu muhiim si dhismayaasha iyo dhulka looga dhigo kuwo nadiif ah ka hor maalinta koowaad ee dugsiga.

Dhammaan da'aha kala duwan waa la soo dhaweynayaa loomana baahna in la isku diiwaangeliyo. Qalab iyo sahay ayaa la bixin doonaa ama kuwaaga kuu gaarka ah ayaad soo qaadan kartaa

[Fiiри liiska dugsiyada ka qayb qaadanaya.](#)

Sanadkani wuxuu astaan u yahay 17^{guuradii} ka soo wareegtay Mashruuca Daryeelka Bulshada. Xagaagii la soo dhaafay in ka badan 7,000 tabarucayaal iyo hawl wadaagayaal ayaa ka qayb qaataay 70 goobood, iyaga oo PPS u badbaadiyay ku dhawaad \$1 malyuun oo doolar oo ah mashaariicda wax nadiifinta.

Su'aalaha? Wac 503-916-3078.

-Rosie Fiallo